

UNITED NATIONS



NATIONS UNIES

**Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia**

Springette, Off Lower Kabete Road, 1st left after Spring Valley Police Station, P.O. Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya  
Tel. (25420) 4183640, 4183642/3/4; Fax (25420) 4183641

**Warbixin ka soo baxdey xafiiska qaramada middobey ee Soomaaliya oo ku saabsan Afdub shaqaale qaramada midoobe loogu geystey Koonfurta iyo bartamaha Somalia**

Nayroobi, Keenya 16 Maarso 2009. Afar ka tirsan shaqaalaha qaramada midoobey ayaa koox dabley aanan heybtooda la garan ku afduubeen magaalada Waajid ee Soomaaliya. Waxay ku sii jeedeen garoonka diyaaradaha marka ay wadada ku joojiyeen rag hubeysan. Wax rabshado ah ama is rasaaseyn lagama soo sheegin goobta uu shilku ka dhacay.

Iyadoon la og yahay halka ay ku sugan yihiin afarta qof ee la afduubtey ayaan weli wax xiriir ah lala sameyn kooxda afduubka geysatey.

Qaramada Middobey iyo madaxda degmada waajid ayaa wada wax kasta oo lagu xaqiijin karo siideynta la heystayaasha si shuruud la'aan ah.

Waxii faah faahin ah kala xiriir Dawn Elizabeth Blalock, afhayeenka qaramada Middobey Mobeylka +2524-734-210-102 amaba e-mailka ah [blalock@un.org](mailto:blalock@un.org).

**Fiiro Gaar ah, Taftireyaasha: waayo aragtinimo laga dhaxley afduubyadii hore ayaa muujineysa warbaahinta oo arrinta si taxadar leh ula dhaqanta in ay fududeyn karto dhaqsi u siideynta laheystayaasha. Hadaba waxaan ugu mahad celineynaa war baahinta garowshiyahooda iyo weliba gacansiin ku aadan dhinaca ka warbixinta arrintaan.**